

# *TIXRAACA DHAQANKA IYO SUUGAANTA*

## *W.Q C/fitaax C. Cali*

## DHAGAR QABIHII MAGAALDA EEDAY

Isagoo lugaynaya meel waddo cagaf ah ay marto oo baabuurta tuulooyinka aadaa ay maraan, ayuu mar kaliya maqlay guux.
Ilbiriqsiyo wax ka yar ayaa jiririco ku jajabtay, hadduuse ogaan lahaa inay sharqantu tahay baabuur, land rover ah oo tuulada caano ka keenay sidaas oo dhan uma uu naxeen.
Isla markiiba wuxuu arkay siigo circa isku shareertay oo bari ka soo socota.
Ilaahay amarkiis waa uu u istaagay baabuurkii, si uu u qaado inkastoo uu magaalada u dhawaa.
Goortii ay dhaqaaqeen ba magaaladii waa ay u muuqatay.

Waa yaab iyo afkala qaad, guryo badanaa, waligii ma uu arag guryo intaas tiro le'eg. Xoog badanaa dadkii dhisay.
Waxaa uu arki jiray tuulooyin dabakaayooyin ka dhisan yihiin iyo waabab iyo mutulayaale, Ma isagaaba arkay guryo sidaan u waaweyn oo uusan arki Karin halka ay ka bilaamaan iyo halka ay ku dhamaadaanba.

Markii gaarigii suuqa looga degtay buu meeluu aado garan waayey, waxaa uu haystaa in adeerkiis magaalada deggen yahay.
Meel uu abbaro ayuu garan waayey, waxay la noqtay in adeerki iyo qabiilkisaba dadkoo dhami yaqaaanaan, oo magaaladoo dhammi is taqaan.

Islaan caano degsanaysa buu weydiiyey oo yiri walal ciise gurraase magaalka xagee kaga jiraa uu?
Walaal maba aqaan, ayay ugu jawaabtay.
Intaas markuu maqlay buu inta xanaaqay isagoo u qaba inay taqane ay ka qarinayso, buuye, maxaad la aqoon weyday waa nin reer quracee.
Walaal ma aqaan bay tiri, cid kale weydii.
Suuye naa naga tag wax ba ha noo sheegine inta iska dhaqaaqay.
Oo oday meel maraya ku yiri nabad ma sheegtay?.
Odaygu waa waayeeloo waa oday macruuf ah oo dadkoo dhammi yaqaanaan,
Waa nabad inta ugu warceliyey buu ye haye adeer kee ahayd?

Suuye adeer ciise guraase ma garanaysaa gurigiisa waa nin reer………… intaas markuu yiri buu odaygii gartay oo yiri waan aqaane adeer muxuu kuu yahay? suuye waa adeer kay.
Ina keen inta yiri buu gurigisia oo u dhawaa keenay oo shaah ka siiyey wiilana ku daray buuye aabe kaxee wiilkan oo gee guriga ciise gurraase.
Markii albaabka laga furay buu arkay oday gaaban oo callool buuran oo meel soo fadhi xun, feerana qaawan.
…





# DHAGAR QABIHII MAGAALDA EEDAY

Waa galab casar gaaba, marna isma uu oran waa adeerka ciise odaygaan xumoo caloosha buuran.
Bariidin iyo isnabdayn ka dib, biyaa loo shubayoo qubaysaa la yiri.

Wax walba waa uu la yaabban yahay, saabbuunta, shukumaanka la siiyey, suuliga laftiisa, iyo guriga weynaantiisa waxayba la tahay inuu adduunkiiba uusan joogin oo waa ashqararsan yahay.

Goor uu qol ku dhex jiro, baa dhallinyaro badan oo ciyaalka xaafadda ah sheekaysanayaan, banooni baa laga sheekaynayaa.
Geelle wax ba waa u bixi la'yihiin.
Waxaa uu la yaaban yahay dhasha magaalo hadal xumidooda iyo xikmad yaraan tooda.
Niyaduu iskala hadlayaayo waxaa ka mid ah hadaladiisa.
Af magaalo waa af la'aan, duulku sawaxan badanaa, af isku dari mahayaan, oo aamusi mayahayaan, hadal milga lehna keeni mahayaan.
Waligood hadal forara lagama waayoo, waa dad jirka ka koray garaadse laguma gorarin.
Bal car yaa garta geddooda, yabqankooda dhagihii na xanuujiyey.
Intuu hadalkaasi calooshiisa dhex marmarayey baa waxaa u soo galay mid heetinya oo kuwii hore fariista oranaya, oo kubbad jeclidiisa xaafaddoo dhan laga yaqaan.
Salaan iyo bariidin isagoon cidna taaran buu inta isa soo maqiiqay, geelle afka la soo galay….. waryaa jagfan cali saalax geelii ka warran?
Iyo erayo ciyaalka magaalku isla yaqaanaan buu meeshii ka furay, saa markaliyaa sacab isku dhacay.
Jiiska kaftanka iyo doodda laguma haysto, oo shaqo kaleba ma leh.
Geelle se qori kama agjabsan karo.
Jiisku markuu daalo siduu u qaylinayo caruurtuna ugu qoslayso buu geelle hadal ku soo gaabiyaa hadal gees jaban waxaan ahayn madal kala yeeri mayside iska aamus, kaasaad ku fiican tahaye caallayahow.

Markii waagii baryey baa quraac loo keenay, lana waraystay.
Canjeeladu si kale ayay ugu dhadhamaysaa, niyaduu iska leeyahay cunno magaalo ma fara badanaa!
Galabtii markii ay ahayd baa odaygu wiilkiisa inta u yeeray yiri aabbe wiilkaan adeerkiin warfaa baa dhalay aroortii dugsiga soo qor, Carwadana gee oo dhar u soo iibi.
Goortii uu carwada tagay baa waxaa ishiisu qabatay dabakaayo nin dan yare ah uu haysto.
…





# DHAGAR QABIHII MAGAALDA EEDAY

Waxaa ku soo dhacay dabaakaayo uu tuulada ku arki jiray oo u caanaha keeni jiray. Waxaa uu iyadana soo xasuustay balbalo yaroo dabakaayada ku dhawayd oo uu jaraha odayaal kula cayaari jiray.
Oday farhu ka go'an yihiin baa jaraha tuuladaas ugu badiyoo, isaga qudhiisa dhawr jeer buu ka badiyey.
Wax kastoo uu arko waxa ay ku reebaan saamayn, qaar wuxuu la xiriiriyaa wixii uu soo arki jiray oo miyiga laga heli jiray iyo tuulooyinka, wax na waa dhaqan magaalo oo ku cusub oo meel uu u qaado ma yaqaan.
Intuu beledka yimi wuxuu la kulmay waxyabao aanu waligii baran maqlna, galab casar diiqii ah ba loo kexeeyey garoon lagu ciyaarayo.
Suu u sugayay kooxdii, goor uu daalay illeen waxaa maankiisa ku jiray jaandheer baa kolly meesha ku I jirtee ama dhaanto hadhow markay isku dhabaqdo , dhexda ka gal, waayo ciyaar wuxuu u yaqaan kuwaas iyo kuwo kale, Saa waxaa soo galay niman surweello lugihii muuqdaan qaba oo uu niyada iska yiri nimanku mana qaawana dharna ma xirnee side wa ka yihiin?! oo dhawr xabbo oo wax uusan waligiis ba arag ah sita, kubaddo tiro badna ayay siteen, dad badan ayaana daba ordayey. Uurka ayuu iska yiri tolw ma weydiisaa cali arrinta, mise waa iska deysaa?

Goor cabbaar la joogo, mise sacab baa la tumay, foorina waa yeertay, nin dhar madow baa afka bir yar ku sita, oo sidii fooridii ka dhiiqsiinya, nimankii tirada badnaa oo teer iyo maanta uu sugayey geelle waa is ceyrsadeen, yaab yey, kubaddii bay isku ceyrsadeen, mise mid baa lugta ku kaxaystayoo laba cararay! Kuwa badana waa gees ordayaan qaarna lugahay ku garaacayaa.
Yaab iyo ashqaraar!
Ciyaar baa jirta ma saanaa, af magaalo tira badanaa, ninkii waswaas baa galay, oo intuu is hayn waayay buuye, war heedhe tanina maxay ahayd, inta istaagay oo dad badan oo ka danbeeyey isku gudbay oo uu ciyaartii ka qariyey, markaasaa lagu qayliyey……… waraa reer baadiye naga fariiso, go'le naga leexo! Iyo erayo la mid ah.
Markaasaa wiilkii yiri naga fariisto yaakhay ciyaar baa soctee.
Suuye meeday ciyaartu, ma nimanka shaqo la'aantu haysaa ciyaaraya, mindhaa inay dagaalamaan bay rabaane, War inaga keen meesha.
Hadduu tagi lahana meel uu afka saro ma yaqaan oo guryaha magaaldu waa u hal jaad, magaalo diimo badanaa!.
si kastaba ha haaatee adkaysan waa.
Kana tagyey oo indhaadayg muuji.
Dhenged haddayey iska dhig laga waayey, buu gacanta ku sitaa garabkana go' baa u saaran shaal ah.
Meeshuu ka yimi maahee jid kale ayuu qabsaday.
Wuxuu sii socdaba hadba surin ka dusaba, kuwa caruur magaalo ah oo dadka





## DHAGAR QABIHII MAGAALDA EEDAY

jididadka isu taaga ayaa luuq isu taagay.
Midbaa yiri ar daya badawga, waryaa gormaa soo gashay adna?, fiiriya bacdii baa ku dhegene, waryaa keen canshuurtii?
Geelle waa nin qab ku jiro ma isagaa ba waxaan hor taagan baa ku taaban kara aaminsan dadba uma haystee.
Afka isagoon ka yeeren baa mid kale soo kacay oo jeebkiisa sare ee shaatiga gacanta u lalmiyey, oo tubako ugu jirtay, daf ka soo siiyey, markuu arkay tubaakadii jeebkiisa lagala baxay iyo dhengeddu isku mar bay ahaayeen.
Kii jeebka gacanta geliyey dhafoorkaa diirmay siduu dhenged ugu waday, markaasay cagaha wax ka dayeen, suu waa uu cayrsaday, ilaa cabbaar.
Kiina meeshii baa dad ka qadeen isagoo dhiig baxaya oo ku calaacalaya hooyooy.. hooyooy maxaa ii geystayeey ……..
Dhirifka iyo carada ka muuqata foolka geelle waa mid aancaad saarnayn, hadda se xoogay waa uu degay mar hadduu kala ceyrshay dhashii sheydaan.

Mar walboo uu dhib geysto waxaa maankiisa ku soo dhacda, dhibaatadii baadiyaha ka soo kaxaysay iyo dhagartii uu soo galay.
Waxa uu soo xasuustaawixii u dhib soo maray iyo rafaadkii miyga, inta jeeree dugaag sigay, habeenadii uu cidlada seexday, markuusuu is weydiiyaa gorrmaad nasaynaysaa?
Magaaladana dhib maahee dheef wali kama uu helin.
Wuxuu socdaba waddadii uu baabuuri marayso buu iska dhex maray isagoon iska eegin jidka.
Baabuur jaadle ah oo meeshii ugu danbaysay ku socda baa afka ku sii qaatay, lamaba soo rogin.
Alla miskiin ma noola.
Aambalaas baa u timid oo meeshii maydkiisii ka qaadday.

Yaraantiisii wuxuu ahaa madi aabihi iyo hooyadiiba rag kaligii ka dhaleen oo gabdho 6 ah toddobeeya.
Aabbihi intuusan dhiman wuxuu oran jiray gablan baan ahay hadduu caawa geelle maxada laabo, isagoo aan gabdhaha awlaad dhabarkiisa rabbi ka beeray aan uba haysan.
Habarta, jinni dhala buu yiraadaayoo, gabdhahaan tirade badan buu ku nacay.

Intii uusan dhiman aabihiis dadku waxay la yaabeen sida ba'an ee uu ugu egyahay odayga dhugashda iyo laf dheeridaba.
Wuxuu ahaa nin aamus badan oo aan hadlin sida adoogiis, dadka yaqaanay aabihi waxay dhahaan wacade kani waa warfaa oo halkaan la soo taagay.
…



## *TIXRAACA DHAQANKA IYO SUUGAANTA*

## *W.Q C/fitaax C. Cali*

# DHAGAR QABIHII MAGAALDA EEDAY

Hooyadii labada indhood bay ka jeclayd.
Isagoo 11 jir ah baa dagaal xumi dhacay oo tolkii iyo qolo kale oo ay ardaa wadaag ahaayeen is dirireen.
Dagaalkaas wxuu ka kacay oday warfaa oo ceel ka waraabinaya geel baa niman kale ceelka xoolahoodii ku soo daayeen.
War naga ceshada xoolaha iyo is jikaar baa meesha ka bilawday.
Xoolaha kale waxaa wadey dhllinyaro geel jire ah oo gardarro iyo aabi isku darsaday.

Inta uu wadaantii sidaayay warfaa buu dhenged inta qaatay geeli jafay oo oo ilaaq iyo dhaaar bilabay, saa nimankii geela watay oo gardarro awalba u socday baa intay hareera ka soo mareen dhenged ku boobay odaygii oo kaligiis ah aysan nimankii soo gaarin ceelka joogay,
Suu inta toorrey iska soodhiftay buu mid dooxay, oo meel xun kaga dhiftay oo caloosha ka soo riday.
Kii kalaa intuu isna iska soo dhifay torrey odaygii mergiyada jaray.
Meeshii buu ku naf baxay, kiina markiiba wuu cararay intuu mid kale oo qori sita kaxaystay.
Kii oo dhaawacana meeshii baa looga caray, meydii odayga baa inata la qaaday meel u dhow lagu aaasay, nasiib wanaagsae nimankii haybtoodii waa la gartay.

Xilligu xilliga ka dhow e markiiba waa la is wargaliyoo nimankii rag baa lagu baxshay, dhaal maraa badan oo ceelka qorrax u dhac kaga aaddanaa baa inta laga dusay, la daba galay raadkoodii.
Goortii in cabbaar ah la socday baa inta la waayay laga soo haray.
Habeenkii dumarkii oo dhan baroor bay u ahayd, raggana talo iyo gorfayn bay u ahayd oo waxaa laga xaajaysanayey sidii la yeeli lahaa mashaqada dhacday iyo colkii la dumi lahaa.
Waxaase yaab iyo ashqaraar lahaa nimanka odayga dilay oo aan wax dhiig , dhaqan iyo dheef toona ah kala dhaxayn, taasoo dadkii afkala qaad ku noqtay.

Qolo kale oo ninka wax dilay isku reer ahaayeen ood wadaagna la ahaa agoonta baa iyaguna dhaqso u maqlay arinta, raggii intii waa weynayd waa baxsadeen.
Meeshii dumar iyo caruur baa looga tegay.
Iyaguna maalmo ka dib bay ka daba guureen, habeen madoow.

Waqtigu wuxuu is guraba sanadaa ka soo wareegay iyadoon loo aarin oday warfaa
Waxaa cid walba maanka ku haysay inuu wiilkiisu hadda weynaaday oo xinjirihii aabihi raggii daadshey ka war keeno.
…





## DHAGAR QABIHII MAGAALDA EEDAY

Kuwo odoyaaloo adeerro ugu aaddanaa geelle baa hadba gabayo kicin iyo diradiraale iugu jira agtiisa ku luuqsha.
Waxaa ka mid ahaa mirahan
Inaan reer Gumaarholoc raggii go'ay u aaraynin
Oo ayan godobtooda maqan goosan kari haynin
Oo aanay garanayn lafaha guban xalaaleeya
Ay goojo dheer wadhi inaan garanayaan sheegay

Geelle se waxas waxba uma arkoo waa nin tashaday waa hore.
Maalinkuu 16 jirsaday buu talo ku goostay inuusan ka harin ninkii aabihiis dilay.
Geelle isaga reerka wiil u ah oo reerka inta kale waa gabdho, isagaa la ga fishaa wax walba marka arrintu dagaal joogto.
Goor habeen kii kala bar tagay walina uu gam'I la yahay oo arrinta uu ka seexan la'yahay tahay mid maalmahanba si gaar ah ugu soo noqnoqnaysay oo ah u aargudkii aabbihii, ayuu goostay inuu gudo, oo aado meel loogu sheegay reerihii anafada u geystay.
Qori uu barkanaa intuu qaatay isagoon wax sahay ahna qaadan buu dhaqaajiyey,.
Habeenkaas socodkiisu ma ahayn mid caadiya oo aad buu u dheeraynayey, waxaa la oran karay wuxuu ahaa socod cabsi badan.
Uma uu aabba yeelayn qoxaha mudaya, geedka marada ka jeexaya, dhagaxa uu suulka hore ku dhifsanayo intaba.
Cida shimbiraha, iyo dabaysha geedaha dhaqaajinaysa waxaa kala daran jibaadka libaaxa meel fog ka jibaadaya, isaguse uu moodayo inuu dabo socdo.
qorraxdu waxay soo baxday ammin uu gooyey dhul maalin dhan lagu maro.
Goor barqadii ah buu meel ili ku wareedhey ah ka arkay reer meel deggen.
Waxuu goostay inuu biyo ka sii cabbo, kana sii dhaqaajiyo.
Reeraha geel baa meel u dhow ku xaraysan, suu kuma uu leexan gurigiiye golihii bu abbaaray.
Is bariidin ka dib, waa isu af baxeen is na haybsadeen.
Hayb kaluu u sheegtay, oo inta caano ka cabbay, reerihiina weydiiyey waddadiisii cagta saaray.
Xilligu inta ka dhoow'e wuxuu u soo dhawaaday halkii ay geela ku haysteen raggii uu intaas oo hoog ah u soo maray.
Golihii halkuu ku yaallay inta soo arkay buu meel u dhow, geed jiq ah galay.
Dhiska ardaaga iyo gogosha taal buu ka gartay inta nine e geela haysa, oo wuxuu ogaaday inay afar nin geela ku hayaan.
Waxaase ugu daran ninkii aabihiis dilay raga kama yaqaan.
Habeenkii ma uu seexan, goor saq dhexe ah buu inta soo dul istaagay raggii oo hurda, oo garbo siman ah buu qorigii oo awalba u diyaarsanaa baas dhinac kaga …

DHAGAR QABIHII MAGAALDA EEDAY

bilaabay oo afartiiba meesha dhigay.
Xabbadihii fuuqna ka ma uu reebin, ee labo qori oo meesha u yaallay raga uu laayey buu xabbadihii intuu isku darsaday dhabada cagta saaray.
Noqoshadu ka dhib badan safarkii hore.
Kana cabsi badan wuxuu jaray masaafo aan caadi ahayn illeen waa nin dhagar qabee. Waxaan maqli jiray dhgar qabe dhulkaa ku dhaqaaqa, geellese isagoon la dilin buu soo galay dhulkii uu ka tagay.
Isagoon ku leexan reero hoodii buu arrin wuxuu isugu geeyey inuusan dib dambe baadiye u sii joogin ee uu magaalka u dhuunto waa sida kaliyee uu ku badbaadi karee